


Sheekada Agostino



LIDA Italia 

Billie Cejka Risnes

Mohamed Abdirashid

5

Soomaali 



LIDA Stories

lidastories.net

Sheekada Agostino

LIDA Italia 

Billie Cejka Risnes

Mohamed Abdirashid




This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 International License.
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>




Magacaygu waa Agostino, waxaan ahay 51 jir. Shaqadaydu waa in aan cuntada ku geeyo baaskiil. Waxaan leeyahay laba gabdhood, laakiin badanaa ma wada hadalno. Sababtoo ah Aniga iyo hooyadood hadda ma wada noolin oo waanu kala tagnay.

Waxaan la noolahay hooyaday, maadaama
aanan awoodin inaan bixiyo kirada furiinka
ka dib. Kiradu aad bay qaali ugu tahay
magaaladan.







Dhawr bilood ka hor waxaan ka shaqaynaayey goob shirkad ah sidii shaqaale waardiye ah. Waxaan dib u hagaajiyay waxyaalihii jabay, waxaan u qaadaayey sanduuqyo, oo caawinayay marka qof kastaa u baahdo caawinaad. Maalin maalmaha ka mid ah shirkadii ayaa shaqada iga eriday. Maan fahmin sababta.



Wakhti dheer kadib dedaalkayagii oo dhan waa noo hirgalay. Mid ka mid ah shirkadaha waaweyn ee keenista alaabada ayaa ku qasbanaaday inay bixiso ganaax aad u weyn oo ay siiso shaqaalaha shaqooyin joogto ah. Waxay ahayd markii ugu horeysay ee ay ka dhacda meel kasta oo adduunka ah. Waxay u egtahay in arrimuhu ay bilaabmeen inay horumaraan.




Waxaan arkay dad badan oo cunto ku
 keenaya baaskiil. Anna waan kaxayn karaa
 baaskiilka, marka waxaan garaacay
 albaabka shirkad weyn oo alaabaha qaada.
 Waxay ii soo bandhigeen saddex Euro oo
 halkii mar ee alaab gayn ah. Waxaan
 sameeyaa 40 € maaliinti, 60 € haddii aan
 aad u nasiib badanahay oo macaamiishu
 igu tilmaan.



Si wada jir ah oo ay weheliyaan dad kale oo
 gaarsiiyayaal ah oo ka socda shirkado kale,
 waxaan koorso ku saabsan xuquuqda
 shaqaalaha ka qaatay urur maxalli ah.
 Waxay noo soo bandhigeen la taliin sharci
 oo bilaash ah. Waxaanu u halgamnay sidii
 aan aqoonsi iyo xuquuq badan u heli
 lahayn.



Ma helo fasaxa wax lacag ah, ma jiro mushahar markaan xanuunsado, wax xuquuq ah oo dhan ma haysto. Uma maleynayo inay taasi sax tahay, balse waxaan u baahanahay shaqada. Inta badan shaqaalaha kale waa muhaajiriin ka kala yimid adduunka oo dhan.



Kadib, markii nin 25 jir ah oo gaarsiiye ahaa uu gaadhi ku dhufatay oo uu dhintay. Maamulka ayaa bilaabay inay na ogaadaan markaa. Waase ceeb inay na ogaadaan marka uu dhintay, waxay ahayd ka hor inta aanay dhicin.